

Qorista habboon ee Af Soomaaliga

W/Q Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd"

Maarso 13, 2015

Gogoldhig

Far Soomaalida muddada dheer la soo adeegsanayay waxaa ku jirta qabyo laxaad leh oo qof wal oo qorista iyo akhriska xiiseeya u muuqata. Qabyadaa eeddeeda kowaad waxaa leh iyada oo aan maalintii farta la hirgeliyay ka dib la xaalayn oo la gu samayn horumarin iyo turxaanbixin. Taa waxaa kaalin ku leh iyada oo aanay muddo dheer jirin hay'ado u xilsaaran ka shaqaynta culuunta afka guud ahaan.

Qoraalkan "*Qorista habboon ee Far Soomaalida*" oo ah natiijo ka dhalatay waaya'aragnimo badan oo aan helay muddadii aan qorista Af Soomaaliga ku soo jiray, waa mid darsaya qabyada jirtaa waxa ay tahay, dabadeed qaabaynaya sida loo ga bixi karo. Baaraandeg dheer ka dib, waa sida i la qummanaatay, oo ah hab ku dhisan runta naxwaha erayga iyo dhawaaqiisa dabiiciga ah, ama dabiiciyoobay. Qoraalkan oo kolkii kowaad lagu faafiyay degalka [WardheerNews](#) sannadkii 2012, dhawr jeer oo dambe ayaan wax ka dooriyay, fikrado i gu dhashay ama dad wax i gu kordhiyay darteed. Haddaba sidaaan imika halkan ugu soo gudbiyay waa ta aan u gu dambayn ka wadi waayay in Af Soomaaliga loo qoro. Go'aankeedana umadda ayaa i la leh.

Maxaa ka dhiman Far Soomaalida?

Dhaliilaha far soomaalida ama adeegsigeeda ku jira ee ay khasabka tahay in la fardaamiyo wax aynnu ku koobi karraa shan ka la ah:

- 1) Lammaanaha *kh, sh, dh*
- 2) Xarfaha labalaabma oo ka la dhiman
- 3) Shaqallo innaga maqan
- 4) Hadalka oo aan is ku si loo qorin
- 5) Kaladuwanaanta dhawaaqyada degaannada oo aan qaamuus loo hayn

Casharka 1-aad: Lammaanaha *kh, sh, dh*

Far Soomaalida hirgashay waxaa ku jirta fadeexad weyn oo ah xarfaha *kh, sh iyo dh*. Saddexdaa xaraf (lixdaa xaraf!) waxa cilladaynayaa waa badnaantooda aan loo baahnayn, iyo dhanka kale in ay yihiin is laxarfo codad kale loo adeegsaday oo soo noqnoqday, iyada oo ay ahayd astaan weliba in ay xaraf keliya u taagnaato. Run ahaantii saddexdaas dhawaaq in sidaa lammaan loo qaatay wax ay muujinaysaa oo keliya in Yurub la gu dayday iyada oo aan la tixgelin baahida Af Soomaaliga u gaarka ah. Eeddaasi wax ay sii darraanaysaa kolka aynnu og nahay in ay jiraan, nasiib wanaag, xarfo Far Laatiinka ku hadhay oo aan Far Soomaalida loo gu danayn.

Waxaa taallay, welina taalla, in saddexda xaraf ee *p, v, z* loo qaato meesha la geliyay *kh, sh iyo dh*. Saddexdaas xaraf in codadka ay afafka Yurub ku yihiin la ga soo raro oo saddexda

soomaaliga ah loo dhigaa waxba ka ga ma duwana farta la qaatay inteeda kale (tusaale ahan c, x iyo q oo codkoodu Far Soomaalida u gaar yahay).

Baahidan waxaa sii xoojinaya iyada oo ay caddaatay codka *dh* in uu ka mid yahay kuwa labalaabma. Taa macnaheedu waxaa weeye in ay foolxumo tahay in la qoro *dhiidhdhi*, *fahdhi* iyo *cadhdho*. Xalku waa in horta astaanta *dh* la gu dooriyo v. Fikradda p/kh, z/sh, v/dh wax ay wax badan ka taraysaa urursanaanta qoraalka Af Soomaaliga oo imika aad u jiidjiidan.

Kolka aynnu iyaga qaadanno hoos ka arag sida ay labadan sadar u ka la qurux badnaanayaan:

Ka dhiidhdhi shisheeyaha ku khaakhuulay
Ka viivvi zizeeyaha ku paapuulay (v adag)

Sadarkaas yar keligii wax aynnu ka ga maarannay siddeed xaraf oo qoris inooga baahnaa, waxaana inoo baaqday meeshii iyo waqtigii aynnu ku qori lahayn.

Casharka 2-aad: Shibbanayaasha labalaabma

Bilawgii waxaa la is la qiray codadka Af Soomaaligu ka abuuran yahay qaarkood kolka ay afka ka baxayaan in ay adag yihiin oo carrabka ama dibnaha ku dhegaan dabadeed ay yeeshaan macne cusub. Xarfaha adkaadaa waa siddeed oo lix ka mid ahi carrabka ayay ku dhacaan kuwaas oo ah d, r, dh, g, l, n. Labada kalena dibnaha ayay ku dhacaan oo waa b iyo m. Xarfahaasi kolka ay adag yihiin waxaa la gu asteeyaa in qoristooda la lammaaniyo si loo ga garto kolka ay fudud yihiin, tusaale ahaan carrab haddii la fududeeyo wax uu noqonayaa carab (nin carbeed), Barre (nin bar leh) iyo bare (macallin).

Xarafka dh bilawgii la gu ma darin kuwa adkaada, waxaa se la hubaa in uu adkaado oo macnayaal ka la duwan sameeyo. Tusaale ahaan dhiidhi (dhiiqo) iyo dhiidhdhi (ficilo), cadho (xanaaq) iyo cadhdho (cudur dubka gala), fahid (qodid) iyo fahdhi (in la fahdhiyo), Fidhin iyo Fidhdhig, magaalada Badhan iyo badhdhanka dharka.

Iyada oo ay sidaa tahay xarafkan ilaa maanta labayntiisa la gu ma dhiirrado waayo kolkiisa hore astaanta loo qaatay ayaa lammaan. Sidaa darteed xeerkiisa labalaabidda la ma raaci karo iyada oo aan horta loo ga guurin astaanta v.

Xeerka lammaanayntu in kasta oo uu hirgalay oo la wada bartay haddana la ma wada ilaaliyo. Haddii aynnu soo aragnay codka adag xarafkaasi in la lammaaniyo in la ga ga badbaadayo la mid noqoshada mid fudud oo la qoraal noqon lahaa, taas oo nuxurka erayga doorin lahayd, kuwan cusub ee meesha la keenay cilladdaasi ku ma jirto. Tusaale ahaan erayga arad (dhul) waxaa ku jirta r keliya, laakiin arrad (dhar beelid) waxaa ku jira laba. Markaa wax ay ka la yihiin a-rad iyo ar-rad. Sii wad oo dheh: a-baar iyo ab-baar, ba-dan iyo bad-dan, sa-rayn iyo sar-rayn, bo-ga iyo bog-ga, ca-dho (xanaaq) iyo cadh-dho (cudur), ke-li iyo kel-li, dha-maan iyo dham-maan, kee-na iyo keen-na iyo ha-low iyo hal-low. Shibbanaha y oo la gu hirgeliyay in aanu labalaabmin, waxaa cad in uu laba laabmo, waxaana caddaynaya ka la duwanaanta erayada ay ka midka yihiin aa-yo (mustaqbal) iyo aay-yo (oorida aabbaha), waa-yo (xilliyo) iyo waay-yo (sabab?).

Guud ahaan erayada sidaas ah waxa macnahooda ka la duwayaa waa in xarafka dhawaaqiisu fudud yahay iyo in uu adag yahay. In badan wax aad arkaysaa nin la yidhaahdo Caddow magcaas oo ka yimid caddaan, kaas oo haddana loo qorayo Cadow oo ah nacab.

Xarfaha aan xeerkaasi qabanayn ee weligood laba noqon karin aynnu halkan isku tusaalaynno: ma-taan, a-jar, a-xad, a-khas, Xa-san, ta-shi, da-cal, a-fo, a-qal, e-keeye, ha-wo, a-yaan. Halkaa waxaa inoo ga cad in aan loo baahnayn labaynta xarfahaas. Haddii se qaarkood dhadhan adagi ku jiri karo sida k, x, s. waa kuwo dabci ahaan is ka adag oo aan haddii la labeeyo nuxur cusubi ka soo baxayn.

Casharka 3-aad: Shaqallo innaga maqan

Far Soomaalidu waa 21 shibbane iyo shan shaqal (iyo shanta shaqal oo dhaqal dheere noqda). Erayga "shibbane" macnihiisu waa aammusane, waayo waa xarfo aammusan oo codku ka soo baxo kolka hore ama gadaal shaqal la ga raaciyo. Erayga "shaqal" isagana wax aynnu qarniyo hore ku soomaaliyeynnaay xarakada Af Carabida la gu higgadiyo.

Haddaba cilmi ahaan waxaa sugan shaqallada Af Soomaaligu ka abuuran yahay in ay ka badan yihiin shanta maanta inoo qoran. Berigii farta la diyaarinayay aqoonyahanno badan baa taa ku baraarugsanaa, gaar ahaan reer Yurubkii Far Soomaalida wax ka qoray qaar baa adeegsaday shaqallo aynnaan imika adeegsan. Shaqalladaa innaga dhimana waa ta keentay in ay jiraan erayo badan oo aynnu is ku si u qorno haddana ka la si u gu dhawaaqno, tusaale ahaan: baad (daaqa xoolaha) iyo baad(wax xoog la gu qaato), inan - (wiil) iyo inan - (gabadh). Labadaa dhawaaqooda haddii aad u fiirsato wax aad arkaysaa shaqalka a in uu kolka hore fudud yahay kolka labaadna culus yahay. Kaa culus ayay ahayd in shaqal kale la ga dhigo.

U fiirso saddexdan eray ee soo socda sida uu shaqal dheeraha "ee" saddexda goor u ka la cod duwan yahay: Eel (lab), eel (dheddig), eey. Oog (dab olol weyn), oog (dab ololi), oogo. Dul (dusha) dul (daloolka sanku), duul (sida shimbirta hawada duul), duul (weerar qaad). Aar (libaax lab), aar (u aar), asal (asalka dhirta ee saamaha la gu magdiyo), asal (wax dhalad ah), aad (halkaa tag), aad (si xoog ah).

Waxaas oo dhami wax ay ina tusayaan Far Soomaalida qoran in shaqallo ka dhiman yihiin. Taa laba siyaaloodba waa loo maarayn karaa. Ta hore waa in faraha kale ee dunida shaqallo dheeraad ah la ga soo ergisto, tusaale ahaan ä oo loo qaadan karo a culus, ë oo noqota e culus ï oo ah i culus, ö oo ah o culus iyo ü oo ah u culus.

Xalka kale waa shaqalka culus shibbanaha xiga in la labalaabo. Tusaale: Inann (gabadh), baadd (ugbaad), beerr (beerta), dull (daloolka sanku), Iimaann (magac lab), Saaffi (magac lab), Dheegg (magac lab), Hanadd (magac lab), Kaydd (magac lab). Magacyadaa iyo kuwa la midka ah dabcan dhiddigooda shibbane qudha ayaa la qorayaa.

Casharka 4-aad: Hadalka oo aan is ku si loo qorin

Qorista Af Soomaaligu wax ay waafaqsan tahay dhawaaqiisa. Taa macnaheedu waxaa weeye, qof walba oo erayga hagaag u yaqaan si qumman ayuu u higgadiin karaa qorista iyo akhriskaba. Habsamidaasi waa ta kaalinta u gu weyn ka qaadatay Far Soomaalidu in ay degdeg u hirgasho. Iyada oo ay sidaa tahay, haddana arrinta waxaa ku jira cillado farabadan

oo aan lahayn xeer la is la og yahay. Arrimaha qoristooda mashaqadu ka taagan tahay aynnu u ka la qaadno sidan hoose:

1) Waxaa jira erayo aad u badan oo sida aynnu u gu dhawaaqno iyo abuurta naxwahuudu ka la duwan yihiin. Markaa qorista ma waxaa la la raacayaa dhawaaqa afka ka baxaya, mise waxaa loo celinayaa abuurta naxwihiisa? Heshiisku wax uu ahaa in dhawaaqa uun la raaco, run ahaan se arrintu sidaa u ma fududa haddii la doonayo in si hagaagsan wax loo qoro. Masaladaa aynnu is yara tusaalaynno.

Xarafka o isaga oo eray ku dhammaaday haddii eray kale gadaal kaga taxmo dhawaaq ahaan wax uu noqdaa a, tusaale: Timo/Timacadde, biyo/biyadiid, xoolo/xoolaraac. Xarafka e isaguna markaas oo kale wax uu noqdaa a, sida: male/mala'awaal, tusaale/tusaalayaal, bare/barayaal. Afka sidaas ah waxaa kale oo ka mid ah laba xaraf oo marka ay is raacaan is diida dabadeed midkood ka kale shiiqiyo, sida: aynnu wada hadalno/hadallo, aynnu is jirno/jirro. Labadaa siyood in kasta oo ta hore naxwe ahaan qumman tahay in ta dambe la qoro ayaa macaan.

Intaa ka sokow, waxaa jira siyaalo ka la duwan oo dhawaaqa erayada loo qaadan karo loona qori karo. Waxaa ka mid ah ayey/ayay, geeyey/geeyay, tegey/tegay/tagey, tagay, weji/waji, mergi/margi, geyaan/gayaan. Waxaa la mid ah cadow/cadaw, qabow/qabaw. Waxaa kale oo la mid ah erayo dhawaaqa la gu gaabsado, tusaale: keli ah/keliya, qudh ah/qudha, waxaad/wax aad, wuxuu/wax uu, waxay/wax ay. Kol walba sida dambe ayaa habboon.

2) Waxaa jira qodob muujiya ahaansho, sida: waan faraxsan ahay, waad xanaaqsan tahay, wuu dhiirran yahay, waa ay qurxoon tahay, waa aynnu badan nahay, waad daallan tihiin iyo waa ay tuban yihiin. Sida aynnu aragno qodobka ahaanshuhu mar walba wax uu u qormayaa gooni, u mana baahna sida ay dad badani qoraan in sifada ka horreysa la gu daro oo la dhigo harraaddanahay, xanaaqsan tahay, dhiiranyahay, qurxoontahay, badannahay, faraxsantihiin iyo tubanyihiin.

Waxaa se jirta marar ay taasi adkaanayso, sida marka ay sifada ka horreysaa ku dhammaato xarfaha sh iyo d ama lahaansho. Jumlada "geed ubax leh" haddii aynnu si kale u dhigno wax ay noqonaysaa "geedku ubax buu leh yahay". Laakiin sida aynnu aragno erayga "leh" markii uu dhexda galay wuu adkaaday wax uuna isu rogay lee waayo h kolka ay halkaa ku jirto afka ayaa diidaya, sidaas darteed wax uu isu rogayaa e. Haddii se la qori lahaa lee naxwaha ayaan oggolayn, waayo waa eray aan jirin. Dabadeed wax aad arkaysaa iyada oo ceebtaas la gu qarainayo in la qoro leeyahay. Taasi mar wax ay meesha keentay eray aan jirin oo ah lee, mar kalena wax ay jebisay xeerkaa ahaa ahaanshaha in goonidiisa loo qoro. Haddii ay sidaa tahay, in la qoro lee laakiin la gooniyeeyo ayaa qumman.

Ahaanshaha iyo sifadu marka ay israacaan iyaga oo dheddig ayaa iyaduna ah cillad jirta. Tusaale ahaan dhuxushu waa ay nooshahay. Sida muuqata naxwaha ma raaci karno oo ma qori karro "dhuxultu waa ay nool tahay", waayo waa hadal abuurtiisu dhimatay. Waxaa kale oo ka mid ah is la dheddigoodka marka ay sifadu ku dhammaato xarafka d, sida "waa ay fudud dahay". Halkaa waxaa ka muuqata xarafka t in uu dhintay oo isu rogay d, markaa "dahay" ma aha af naxwe ahaan jira, haddana waa in la qoraa iyada oo u taagan "tahay".

3) Erayada Af Soomaaligu sida ay u ka la maarmaan iyo sida ay isu lee yihiin loo ma qoro, ee badanaa hadal aan shuqul is ku lahayn ayaa la is ku dhedhejiyaa. Haddii aad is wayddiiso Af

Soomaaliga qorani waxa uu u jiidjiidmo, taas oo foolxumaysa, sababtu waa erayo ka la madaxbannaan oo la is ku qoro. Foolxumada uun ma aha ee naxwaha afka ayaa sidaa ku cilladadooba. Qodobkani run ahaantii waa ka u gu daran haddana u gu badan ee qorista ku jira.

Tusaale ahaan la ma garan karo bilawgii waxa keenay in la qoro "waxaan kula jeclahay inaad ila garato qorista habboon". Dhab ahaantii waxaa qumman in la qoro "wax aan ku la jecel ahay in aad i la garato qorista habboon". Waxaad, waxaan, waxay, wuxuu iyo kuwa la midka ahi waa erayo macne ahaan iyo naxwe ahaan ka la go'i lahaa oo haddana la is raaciyu. Wax ay ahayd in la qoro "i la ma aha", waxaa se la qoraa "ilama aha". Saddexdaa eray ee i, la, ma shuqul is ku ma laha oo mid waliba is kii buu u taagan yahay. Waxaa la mid ah: "kaga/ ka ga", "kugu/ku gu", "laga/la ga", "lagu/la gu"... Halkaa xarafka g waa k dhimatay, waana in sidaa loo oggolaadaa loona qoraa.

Xaq ma aha in la yidhaahdo goor walba dhawaaqa afka ka baxaya qorista ha la la raaco, waayo dadku kolka ay hadlayaan afka aad ayay u jejebiyaan oo u silciyaan, iyada oo ay ka tahay fududaysi. Tusaale ahaan weedha "waa maxay?" dad badan baa ku gaabsada "waa xay?". Waxaa la mid ah "waayay" oo ah "waa yahay", "waatay" oo ah "waa tahay". Gobolka Shabeellaha Dhexe badanaa "maxay tahay" ama "muxuu yahay" waxaa la gu koobaa "xay tahay" iyo "xuu yahay".

4) Eray ama ka badani kolka ay eray qudha isku noqdaan, qoristooda dad baa isugu xidha jiidin, dad kalena waa ay ka la gooyaan, dad saddexaadna toos ayay isu raaciyaan. U fiirso tusaalayaashan "af ka la qaad, af-kala-qaad, afkalaqaad", "gacan ku dhiigle, gacan-ku-dhiigle, gacankudhiigle", "wax ma garad, wax-ma-garad, waxmagarad", keli taliye, keli-taliye, kelitaliye", abaal laawe, abaal-laawe, abaallaawe", "inan la yaal, inan-layaal, inanlayaal".

Intaas oo siyaalood garasho ahaan iyo qurux ahaanba sida u gu dambaysa ayaa u gu qumman.

Magacyada lammaan ama saddexan ee midka qudha is ku noqda iyagana waa in la is raaciyaa, mana aha in la ka la jaro ama jiidin la isu gu xidho. Tusaale: Tog Dheer, Tog-Dheer, Tog-dheer (qor Togdheer). Gacan Libaax, Gacan-Libaax, Gacan-libaax (qor Gacanlibaax). Laas Caanood, Laas-Caanood, Laas-caanood (qor Laascaanood). Dhagax Buur, Dhagax-Buur, Dhagax-buur (qor Dhagaxbuur). Qabri Taharre, Qabri-Taharre Qabri-taharre (qor Qabritaharre). Ceeri Gaabo, Ceeri-Gaabo, Ceeri-gaabo (qor Ceerigaabo). Baar Gaal, Baar-Gaal, Baar-gaal (qor Baargaal). Balad Weyn, Balad-Weyn, Balad-weyn (qor Baladweyn). Buulo Xaawo, Buulo-Xaawo, Buulo-xaawo (qor Buulaxaawo).

5) Qorista kolka ay laba shaqal oo aan wada soconi is ku dhacaan dadku waa ay ku dhibaatoodaan. Tusaale ahaan "waayo aragnimo, waayoaragnimo, waayo-aragnimo, waaya'aragnimo" iyo "la aan, la-aan, la'aan" intaba waa la qoraa. Runtu se wax ay tahay, sida u gu qummani waa ta u dambaysa ee hamsadu ka la soocdo.

Hamsada waxaa kale oo loo adeegsan karaa siyaalo badan oo qoraalka qurxinaysa. Siyaalahaas waxaa ka mid ah sidaa hore oo kale haddii ay laba shaqal oo ka la duwani is ku arbushmaan in la gu ka la basriyo, tusaale ahaan Fu'aad, su'aal, go'aan, la'aan, lo'aad, li'i, bi'in, la'eg. Hamsada waxaa kale oo la gu ka la xidhi karaa labada xaraf ee haddii ay is raacaan macnuhu lumayo ama doorsoomayo, sida mad'hab iyo hud'hud.

Waxaa se jirta si hamsada bilawgii loo hirgeliyay taas oo aan loo baahnayn. Tusaale ahaan wax aynnu og nahay hamsadu in ay gadaal ka ga dhacdo shaqalka kulul, sida "ri'da" taas oo haddii laga tago yeelanaysa macne kale oo ah "rida" (dumiya), "ba'an" oo noqon lahayd "baan", "da'da" oo noqon lahayd "dada" iwm. Haddaba eraydaasi marka ay ku joogsadaan barta hasmadu saaran tahay u ma baahna in gadaal la ga raaciyo oo la qoro: ri' iyo ba' iyo da' waayo dhawaaqu doorsoomi maayo sidaa darteed waa la ga maarmayaa.

6) Waxaa jira qodobbo dibgale ah oo erayada gadaal ka raacraaca, kuwaas oo aan sida loo qorayo is ku aragti la ga ahayn. Kuwaa waxa loo baahan yahay in xal midaysan loo helo. Saddex baa u gu daran ama u gu caansan oo qoristooda dadku aad u gu ka la qaybsan yahay. Waa dibgalayaasha "ba", "na" iyo "se". Waxaa la qoraa "adigana iyo adiga na", "anigaba iyo aniga ba", "iyadase iyo iyada se". Anigu beri baan qabay labada hore in erayga la ga jaro, waan se ka noqday taladaa waayo akhriskooda goonida ahi wuu dhadhan xun yahay, is la markaa naxwe ahaan gooni ma noqon karaan oo macnaha erayga ayay ka mid yihiin.

Qodobka kale ee "se" oo kuwaa hore ka duwani dhismaha hadalka ayuu u yahay laxaad, waxaa se shiiqiyay ka carabiga ah ee "laakiin". Waa eray is kii u taagan, weedhana hor iyo gadaal kii la doonaba wuu ka geli karaa. Waxaa la qori karaa "Af Soomaaligu waa hodan hagaag se loo ma qoro", ama "Af Soomaaligu waa hodan se hagaag loo ma qoro".

Kuwaasi waa dibgalayaasha, waxaa se jira horgalayaal xaaladda u eg, waxaana ka mid ah "is". Eraygaasi mace xaddidan oo gooni isu taagaya ma leh, haddana raacinta erayada qaarkood aad buu u foolxumeeyaa. Kolkaa wax uu ku qurxoon yahay in la gooniyeeyo oo la qoro "is sheeg", "is ka daa", "is keen", "is wayddii" iwm.

7) Dood baa la ga furi karaa israacinta ama ka la goynta erayga iyo aqoonninkiisa, sida "afka" ama "af ka", "farta" iyo "far ta", "runta" iyo "run ta", "guriga" iyo "guri ga". Sida dambe dad yar oo ku dhiirraday baa jira. Faraha dunida labada siyoodba waa la adeegsadaa. Tusaale ahaan Farta Carabida, Ingiriisida, iyo Iswiidhishku siyaalahan ayuu aqoonninku erayga u gu dhacaa kolka loo eego Af Soomaaliga:

Carabi: xarf, alxarf.

Ingiriisida: letter, the letter.

Iswiidhishka: bokstav, bokstaven.

Soomaaliga: xaraf, xarfka.

Halkaa waxaa ka muuqata qodobka aqoonninku in uu Carabida iyo Ingiriisida horta ka galo, iyada oo Carabida erayga la raaciyo Ingiriisidana la ga gooyo. Taa beddelkeeda Iswiidhishka iyo Soomaaliga gadaal buu ka raacaa.

Arrintani wax ay ka mid ahayd waxyaalo kolkii Far Soomaalida la hirgeliyay heshiis la'aan iyo talagal la'aan ku dhaqangalay. Abuur ahaan Af Soomaaligu qodobka aqoonninku isaga oo ama lab ama dheddig, haddana labadaas baa tarma oo siyaalo ka la duwan u dhaca. Tusaale ahaan asalku haddii uu yahay "ka" oo labka ah iyo "ta" oo dheddigga ah, sida "inanka" iyo "inanta", in badan oo abuurtaas ka mid ahi waa ay dhimatay ama doorsoontay, wax ayna tagtay xaalad kale oo aan aqoonninku "ka" iyo "ta" midna ahayn, sida "badda" oo asal ahaan ahayd "badta", "hasha" oo ahayd "halta", "guriga" oo ahaa "gurika" iwm. Kuwaa waxaa la mid ah: "gabadha", "saca", "qudha (nafta)" iwm oo qodobkoodii aqoonninku aad u fog yahay.

Xaaladahaas oo dhami wax ay caddaynayaa Af Soomaaliga in aan erayga iyo aqoonninkiisa la ka la qori karin.

8) Qoraalka afafka dunida siyaalo ka la duwan baa loo ga dhaqmaa magacyada iyo ciwaannada sida loo waaweyneeyo, innaga se taasi weli inoo ma saldhigan. Waa xeer la is la yaqaan marka Far Laatiinka la adeegsanayo in magaca gaarka ah xarafkiisa u gu horreeya la weyneeyo, sida *Aadan, Hargeysa* iyo *Afrika*. Haddaba isiraynta ama u abtirinta magacyadaa miyaa la weynaynayaa iyaga oo aan ahayn magacyo gaar ah? Sow ma aha in la qoro: *bani aadan, reer hargeysa, iyo dawlad afrikaan ah?*

Magacyada iyo tilmaamaha guud ee sifada iyaguna u ma baahna in la weyneeyo sida *madaxweynaha, wasiirka, wasaaradda, guddoomiyaha, taliyaha*, iyo kuwa la midka ah ee aan cid u gaar ahayn. La ma weynayn karo magacyada guud sida *waraabe, ayax, geed, roob, magaalo, aabbe, walaal, nin, gabadh* iwm.

Ciwaannada ka kooban dhawr eray eray walba in xarafkiisa kowaad la weyneeyo iyo in erayga kowaad oo keli ah xarafkiisa kowaad la weyneeyaa waa laba hab oo jira. Tusaale ahaan ummadaha qaar wax ay qoraan *Wasaaradda Arrimaha Gudaha*, kuwo kalena *Wasaaradda arrimaha gudaha*. Labadaa siyaalood Far Soomaaliga weli waa la is ku dhex wadaa, sida dambe ayaa se qumman, waayo magac gaar ah, kokaa eraygau gu horreeya xarfka u gu horreeya ayaa ciwaanka oo dhan matala.

9) Dad baa iyaga oo Af Soomaali wax ku qoraya haddana adeegsada codad (xarfo) aan Af Soomaali ahayn. Tusaale ahaan magacyada *Saynab, Samsam* iyo *Sakariye*, oo ah Carabi soomaaliyoobay, dad badan baa u qora *Zeynab, Zamzam* iyo *Zakariye*. Dadka sidaa yeelayaa wax ay maskaxdooda ka saari kari la yihiin Af Carbeedka uu magacaasi asal ahaan ka soo jeedo, waxaana ka maqan Af Soomaaligu in aanu lahayn dhawaaqa carabida ah ee ay halkan ka raadinayaan. Tusaale ahaan *salaad* iyo *soon* xarafkooda kowaad Af Soomaaliga loo ga heli maayo dhawaaq u dhigma ka uu Carabida ku yahay, loo mana baahna waayo Af Soomaaligu ma qaadan karo. Xitaa la ma odhan karo *salaat* iyo *sowm*. Af Soomaaligu wax uu ka kooban yahay 21 shibbane, in uu cod 22-aad la soo geliyaana waa macno darro mana shaqaynayso, waayo cod Af Soomaali ah ma aha.

Kuwaa waxaa la mid ah magacyo dhawaaqooda u dambeeyaa Af Soomaaliga dooriyo, sida *Ibrahiim/Ibraahin, Adam/Aadan, Ilhaam/Ilhaan Xaliima/Xaliimo, Faadima/Faadumo*. Taa waxaa ka duwan erayada iyo magacyada aan soomaaliyoobin dhawaaqooda oo ay qasab tahay in sidooda loo qoro, waayo afka ayay ka baxsan yihiin oo haddii kale aan la is ku la garanayn. Tusaale ahaan *VOLVO, New York, Clinton* la gu ma soomaaliyeyn karo *FOLFO, Niyuu Yok, Kilinton*.

10) Waxaa jira xeerar loo raaco habka qoraalka loo qaabeeyo, kuwaas oo aan Far Soomaalida la is la meeldhigin. Waxaa ka mid ah taxanaha hadal ee qodobaysan kolka loo adeegsanayo xaraf u taagan tiro. Kolka qodobkaa la ga hadlayo arrinta fiirada mudani waa Far Soomaalida oo ka kooban laba qaybood oo ka la soocan, ahna shibbanayaal iyo shaqallo. Markaa kolka xarfaha loo adeegsanayo tiro ahaan, ma shibbanayaasha oo qudha ayaa la adeegsanayaa mise waa la is ku dhex wadayaa?

Ma sida Laatiinka ayaa la qorayaa: a) *aniga*, b) *adiga*, c) *isaga*, d) *iyada*... sidaas oo aan ahayn sida ay Far Soomaalidu u taxanto? Mise waxaa la qorayaa: a)... b)... t)... j)...? Mise: b)... t)... j)... x)...? Mise haddii la doono: a)... e)... i)... o)... u)... b)... t)...?

11) Kaladuwanaanta dhawaaqyada degaannada

Dalweynaha soomaalida dhawaaqa erayada qaarkood degaanka ayay is la beddelaan. Waxaa u gu caansan labada dhawaaq *dh* iyo *r*, sida *xiriir* iyo *xidhiidh*. Kolka loo fiirsado labada dhawaaq si isu dhow ayay degaannada soomaalida u gu baahsan yihiin.

Codkaasi ma aha, sida ay dad moodaan, *r* kasta oo marka ay koonfurta joogto eraygu ku dhammaado ama dhexda ka gasha, jeerka ay waqooyi tagto in ay noqoto *dh*, iyo sidaa beddelkeeda. Waa se dhawaaq gaar ah oo leh xeer u gaar ah. Xeerkaa ilaa maanta aqoon ahaan la ma qeexin, sida aan loo qeexin labadaa kooda horreeyay, *aniga* oo u badinaya in *r:du* horraysay. Waxaa se hubaal ah dhawaaqaas in aan eraygu ka bilaaban, is la markaa waxaa hubaal ah in uu laba shaqal u dhexeeyo ama erayga ku dhammaado. Sida qudha ee la gu ka la garan karaa waa in qofku ku wada barbaaro oo ay dareenkiisa si dabiici ah u galaan.

Xeer ahaan in la yidhi (yiri) labada siyood qof waliba ka uu doono ha u qoro, waxaa dhaanta in xal kale la helo, waayo af keliya oo haddana ka la si loo qorayo waa la ga wanaagsan yahay. Haddii la ga fursan waayo arrinka in xal loo raadiyo, waxaa meesha la keeni karaa xaraf saddexaad oo aan labada astaamood ee *dh* iyo *r* midna ahayn, la guna qoro codka la gu ka la duwan yahay ee kolba si noqonaya. Xarafka cusub ee dhexdhexaadka ah kolka la gu qoro labada siyood qofba ta uu doono ha u akhriyo iyada oo la isu la garanayo in uu yahay kii la gu ka la duwanaa.

Kaladuwanaanta labaad ee degaannadu waa erayada is ku midka ah, sida *wax/walax*, *annaga/unnuka*, *isaga/asaga/usaga* iwm. Ama kuwo is ku mid ah oo yara rogma, sida *irbad/cirbad*, *suxul/xusul*, *xabaal/xawaal*, *weeye/waaye*, *gabbasho/gambasho*, *sarkaal/sargaal*. Ama kuwo is ku macne ah oo adeegsigooda la is ku doordoorsan karo, sida *imika/hadda*, *ukun/ugxan*, *dabbaal/doqon*, *suugo/sanuunad*, *maddiibad/baaquli*, *gudin/masaar*, *girgire/burjiko*, *kalluun/mallaay*, *xabxab/qare*, iwm. Hadalka jaadkaas ah qaamuus la'aanta iyo qoraallada oo yar ayaa u sabab ah in la is la wada aqoon waayo.

Erayadaa waxaa ka duwan kuwa asal ahaan ama hayb ahaan silloon, sida *tallaagad/firinjeer* oo labaduba ah shisheeye ku soomaaliyobay *qaboojiye*.

Ibraahin Yuusuf Axmed

Email: Ibraahinhawd@hotmail.com